# Rejada Bulshada Soomaaliyeed

# RBS

# Waxaanu ka xunahay xaalka wadanka uu marayo 64 sanno ka dib:-

- Ma jirto Cadaalad waxaana kuugu filan markhaati Xukunka Ku dhacay Sacdiyo Macalin Xasan, oo markii qiil kale loo waayey garsoor qabyaaladaysan oo careysan uu ku xukumay inaysan laheen license $150 qiimihiisu yahay, oo meel aduunka ka mid ah aanu jirin qiimahaas .

- Ma jirto Dawlad qiyam leh iyo Madaxweyne garasho leh waxaana kugu filan sida loogu bahdilay Xasan shiikh safarkiisii u danbeeyey ee Nairobi, 22/06/26.

- Ma jirto xukuumad oo waxaynu arkayney Ra'iisul wasaare ku xigeenkii 2aad Jibriil oo Nairobi laga musaafurinayo xalay oo 26ka ah, kadib markii uu la soobaxay labada baasaboor ee soomaaliya iyo kan Kenya.

- Ma jiro Mucaarad tayo leh oo waxa jira inka badan 30 Urur Siyaasadeed oo aan kala garanayn bidix iyo midig, awaamirna ka sugaan dawlado shishiyeeye.

- Ma jirto midnimo waxaase jirta burbur baaxad leh oo maamul goboleedyadii qaarkood go'een, qaar kalena qalalaaso siyaasadeed ay ka jirto.

- Ma jirto albaab furan oo wada hadal ah oo u dhexeeya Soomaaliya iyo Soomaaliland , waxaase taagan taa caksigeeda

**colaad hor leh iyo Israel oo si cad ugu soo bareertay kala goynta modnimadii dhuleed.**

**In xaalku sidaa u ekaado 64 sano kadib waa masiibo weyn oo ka timid hogaan xumida Maantay jirta.**

Allow Amuuraha Sahal

